


WAA MAXAY AUTISM?



AUTISM-KU MA AHA CUDUR


Cilladaha kal duwan ee Autism-ka waxa sababa ukoridda maskaxda. Waxa ay ku bilaabantaa oo ay soo ifbaxdaa caruurnimada hore. Qof kama “bugsan” karo autism-ka. Kaliya saddex meelood meel dadka qaba cilladaha kala duwan ee autism-ka ayaa leh naafonimo dhanka korriinka ah.



CALAAMADAHA AUTISM-KA WAA MAX QOF KASTA UGAAR AH QOFNA QOF AANU LA MID AHAYN

Qaar waxa ay ubaahan yihiin taageero aad u badan noloshooda maalin laha ah, halka qaarna ay awoodaan inay si wacan noloshooda u wataan. Taageero shakhsi ahaan ku habboon qof kasta waxa ay caawin kartaa dadka iyagu qaba cilladaha kala duwan ee autism-ka (iyo kuwa u dhowdhow) si ay unoolaadaan nolol xor ah oo midho leh.

CILLADAHA KALA DUWAN EE AUTISM-KU WAXA QAYB KA AH ASTAAMO GUUD OO LAGU AQOONSADO



- Dhibaatooyin dhanka xidhiidhka ah haday noqoto mid hadal ah iyo mid aan ahaynba
- Dhibaatooyin dhanka fahamka fikradaha iyo dareemada dadka kale
- Necbaanshiyo amba danba ka gelid la'aan dareemada sida maqalka, taabashada, iftiinka, dhadhanka iyo urta
- Doonitaan ah raacitaanka ruutiin markasta iyo ku celcelinta habdhaqan isku mid ah



CILLADAHA AUTISM-KA WAXA SIDOO KALE KA MID AH KU YEELASHADA AWOODO MEELAHA QAAR

- karti wanaagsani dhanka ufiirsasahada waxyaalaha yaryar
- uyeelashada awood fiican inuu diirada saaro qofku waxa uu xiisaynaayo
- dareen xooggan oo dhanka caddaalada ah



AUTISM-KA MAR WALBO LAGAMA ARKI KARO QOFKA

Autism-ku ma aha mid qofka mar walbo laga arkayo. Dadka marmar waxey ay qalad u fahmi karaan habdhaqanka qof qaba autism-ka. Qaabka dadka autism-ka qabo ey udhexgalaan bulsada wey ka duwanaan kartaa qaabka dadka kale.



CILLADAHA AUTISM-KA WAXA LAGU ARKAA DADKA DUNIDA KU NOOL OO DHAN

Ku dhawaad 1% dadka ayaa iyagu leh nooc cilladaha kala duwan ee autism-ka ah. Innagoo qiyaastan raacayna, waxa la qiyaasi karaa in ku dhawaad 55,000 qof oo ku nool Finland ay qabaan cilladaha autism-ka.

